Pensionsvalet

# 1. KAP-KL – hawlgabka shaqaalaha hawlgabka ee loogu talogalay adigaaga shaqaale ka ah degmo ama gobol

Adigaaga ka shaqeeya degmo, gobol, ururo degmo, urur degmo ama shirkad degmo ee aan u wareegin AKAP-KR 2023 waxaa ku khuseeya heshiiska hawlgabka ee KAP-KL.

Marka shaqo-bixiyahaagu uu lacagta hawlgabka siiyo Doorashada hawlgabka ayaa lacagtaa loo gudbiyaa shirkadda caymis ee aad dooratey. Wareejintan waxaa la sameeyaa dhammaadka Maarso sanad walba.

## Maxaa ku jira lacagta shaqaalaha hawlgabka ah ee KAP-KL?

Dhammaan dadka ay khuseyso KAP-KL waxay xaq u leeyihiin:

- Lacagta hawlgabka da´da ee ku go´aansan khidmad
- Lacag hawlgab oo la siiyo dadka laga dhintay

Intaa waxaa dheer, mushahar xoogaa sareeya markaad leedahay in aad macaashi karto lacag hawlgab dheefeed qeexan.

Kooxaha qaarkood, tusaale ahaan kuwa ka shaqeeya dhanka adeegga badbaadinta, waxay heli karaan xitaa lacag hawlgab ah heshiis gaar ah laga bilaabo da'da 58 jir.

## Inta ay leegtahay lacagta shaqaalaha hawlgabka ee shaqo-bixiyahaagu bixiyo

Sannad kasta, laga bilaabo da´da 21 ayaa shaqo-bixiyahaagu qayb ka mid ah mushaharkaaga ku bixiya lacagta hawlgabka da'da ahna khidmad cayiman.

Shaqo-bixiyaha ayaa bixiya:

- 4.5 boqolkiiba dakhligaaga sanadlaha ah ilaa 30 ah caddadka ku salaysan dakhliga*

Adigaaga haysta dakhli ka badan 7.5 caddad ku salaysan dakhliga waxa kale oo aad macaashaysaa lacag hawlgab dheefeed qeexan laga bilaabo da´da 28 jir.

*Dawladu sanad walba waxay go'aamisaa caddadka ku salaysan dakhliga iyadoo lagu salaynayo horumarka mushaharka ee bulshada. Caddadka ku salasan dakhliga waxaa la isticmaalaa xilliga xisaabinta kharashyada lacagta hawlgabka.

Pensionsvalet
E-post: info@pensionsvalet.se, Telefon: 0771-650 111, pensionsvalet.se
Postadress: Pensionsvalet, Box 90209, 120 23 Stockholm

Pensionsvalet

Si aad u hesho lacagta hawlgab dheefeed qeexan oo buuxda waa in aad soo shaqaysay 20 sano. Lacagta hawlgabka waxay ku salaysantahay mushaharkaaga ku salaysan hawlgabka ee ka sareeya 7,5 caddadka ku salaysan dakhliga iyo wakhtiga aad soo shaqaysay ka dib 1998 (xaaladaha qaarkood xitaa wakhtigii ka horeeyay 1998 waa la xisaabin karaa).

## Doorashada lacagtaada hawlgabka da'da ahna khidmad cayiman.

Waxaad samayn kartaa doorashooyinka soo socda dhanka lacagtaada hawlgabka da'da ahna khidmad cayiman:

- Waa tee shirkadda caymiska ee gacanta ku hayn doonta lacagtaada hawlgabka

- Haddii lacagta hawlgabka la dhigayo caymis caadi ah ama caymis sanduuq maaliyadeed

- Haddii aad rabto lacag celin ilaalin. Ilaalinta macnaheedu waa in qoyskaagu helayo lacagtaada hawlgabka marka aad dhimato. Wax lacag ah kuma baxayso laakiin haddaad doorato ilaalinta lacag celinta markaas lacagtaada hawlgabka wax yar ayay hoos u dhacaysaa.

Gal pensionsvalet.se si aad u doorato shirkad caymis iyo habka kaydinta. Ilaalinta lacag celinta waxaad ka baddalaysaa shirkadda caymis ee aad doorатay.

Haddii aadan adigu wax doorasha ah samayn markaas lacagtaada hawlgabka waxaa la dhigayaa caymis caadi ah lehna ilaalinta lacag celinta kuna yaal KPA Pension.

Dareen xor u ah inaad is barbar dhigto khidmadaha shirkadaha iyo soo celinta taariikhiga ah. Wakhti kasta oo aad rabto ayaad baddali kartaa doorashadaada lacagta hawlgabka ee mustaqbalka, waxaad xitaa fursad u haysataa in aad rasamaalka aad horey u samaysay u wareejisid shirkad caymis oo kale.

Pensionsvalet

# 2. Sidan ayay doorashadu u dhacaysaa

Marka shaqo-bixiyahaaga lacagta hawlgabka siiyo Heshiiska hawlgabka ayay iyagu lacagtaas u gudbiyaan shirkadda caymis ee aad dooratay. Wareejinta waxa la sameeyaa dhamaadka bisha Maarso sanad kasta waad arki kartaa inta ay leegtahay shaqo-bixiyahaagu lacagta uu lacagta shaqaalaha hawlgabka ah marka aad gasho pensionsvalet.se.

Markaad bilowdo shaqo cusub, waxaad heli doontaa warqad doorasho oo ka timi Doorashada lacagta hawlgabka. Halkaas ayaan kuugu sheegaynaa nooca doorasho ee aad samayn karto dhanka lacagtaada shaqaalaha hawlgabka ah.

Adiga laf ahaantaada ayaa dooran kara nooca shirkadda caymis ee gacanta ku hayn doonta lacagtaada shaqaalaha hawlgabka ee mustaqbalka iyo haddii la dhigayo caymis caadi ah ama caymis sanduuq maaliyadeed.

Haddii aadan adigu iskaa u dooran, lacagtaada hawlgabka waxa lagu meelayn doonaa caymis caad ah oo leh ilaalinta dib u bixinta ee KPA Pension.

## Gal si aad u samayso doorashadaada

Marka aad gasho pensionsvalet.se, waxaad dooran kartaa shirkadda caymis ee gacanta ku hayn doonta lacagtaada shaqaalaha hawlgabka ah iyo haddii la dhigi doono camis caadi ah ama caymis sanduuq maaliyadeed

## Dooro shirkadda caymiska

Dooro shirkadda caymiska ee gacanta ku hayn doonta lacagtaada shaqaalaha hawlgabka.

Waad isbarbardhigi kartaa:
- khidmadaha shirkado kala duwan
- faa'iidooyinka ay sameeyeen taariikhiyan shantii sano ee ugu dambeeyay

Maskaxda ku hay in faa'iidooyinka taariikhiyan ah aanay wax damaanad ah u noqonayn mustaqbalka.

## Dooro qorshe kayd

Dooro haddii aad rabto in lacagtaada shaqaalaha hawlgabka lagu kaydiyo caymis caadi ah ama caymis sanduuq maaliyadeed

**Caymis caadi ah:**
- Qorshaha kaydka leh caddad lacag ah oo la damaanad qaaday
-Lacagta meel ayaa laguu dhigayaa
- Kharashyadu inta badan way ka hooseeyaan caymiska sanduuq maaliyadeed

**Caymiska sanduuq maaliyadeed:**
- Qorshaha kaydka aan lahayn caddad lacag ah oo la damaanad qaaday
-Lacagta si toos ah ayaa loogu kaydiyaa sanduuqyo maaliyadeed oo horey loo doortay, laakiin sidoo kale adigu waxaad dooran kartaa sanduuqyo maaliyadeed
- Kharashyadu inta badan way ka sareeyaan caymiska caadiga ah

## Sidan ayaad u wareejinaysaa rasamaalka aad horey u macaashtay

Haddii aad horey shaqaale ka ahayd degmo ama gobol waxaad dooran kartaa in aad wareejiso lacagtaada shaqaalaha hawlgabka ee ilaa imminka aad macaashtay.

Waxaad heli doontaa warbixinta dhammaan caymisyada leh raasamaal la wareejin karo oo waxaad arkaysaa inta uu leegyahay raasamaalka yaala shirkad walba oo caymis. Marka ugu horeysa ee aad hesho macluumaadkan ayaad go´aansanaysaa haddii aad rabto in aad fuliso wareejin.

Sidan ayay u dhacaysaa wareejintu:
1. Gal pensionsvalet.se
2. Dooro Wareejinta lacagta shaqaalaha hawlgabka ah
3. Codso warbixinta raasamaalka la wareejin karo
4. Dib u eeg warbixintan
5. Dooro nooca qorshaha kayd iyo shirkad caymis haddii aad iyaga dhexdooda rabtin inaad ku wareejisid raasamaal
6. Wareejinta ayaa bilaabmaysa – waxaad dib uga noqosho samayn kartaa gudaha 10 maalmood ama.
7. Wareejin waxay caadi ahaan qaadataaa qiyaastii 45 maalmood.

Pensionsvalet

# 3. Markaad ku dhowdahay hawlgabka

Dad badan ayaa rajo ka qaba in ay xilka ka tagaan ka dib nolol shaqo oo dheer. Laga yaabee in aad rabto in aad gebi ahaanba joojiso shaqada, wakhtiga yarayso ama sii wado in aad shaqayso muddo.

Waa kuwan waxyaabo ay tahay inaad ka fikirto ka hor inta aanad go´aan gaarin:

**1. La soco lacagta hawlgabkaaga**

Waxaa dhici karta in aad lacag hawlgab ku leedahay dhowr shaqo-bixiye. Gal bogga intarnatka ee shirkaddaha caymis ee aad ku soo jirtay, ama minpension.se si aad u aragto lacagtaada hawlgabka oo dhan – lacagta hawlgabka guud, lacagta shaqaalaha hawlgabka ah iyo kaydka gaarka kuu ah- Minpension waa adeeg hawlgab madaxbannaan oo ku tusaya inta ay leegtahay lacagta aad macaashtay ee dhammaan lacagahaaga hawlgabka.

**2. Goorma ayaad rabtaa inaad bilowdo in aad la baxdo lacagtaada hawlgabka?**

Adigaaga ka shaqeeya degmo ama gobol waxaad badanaaba la bixi karta lacagta shaqaalaha hawlgabka ah laga bilaabo da´da 62 jirka. Waxaad xaq u leedahay inaad sii shaqeyso ilaa aad ka gaadhayso 69 jir. Markaad wakhti dheer sii shaqayso waxaa sii kordhaysa lacagta hawlgabka ee aad helayso. Minpension.se waxaad ka samayn kartaa tijaabin oo ka akraysaa inta ay leegtahay lacagta hawlgabka ee aad heli karto wakhtiyo kala duwan. Maskaxda ku hay in aanad u baahnayn inaad la baxdo lacagaha hawlgabka oo dhan wakhti isku mid ah.

**3. Intee in le'eg ayaad rabtaa inaad soo qaadato lacagtaada hawlgabka?**

Adiga ayaa go'aaminaya dhererka wakhtiga aad rabto in lacagta shaqaalaha hawlgabka lagu siiyo. Wax kasta oo laga bilaabo toban sano ilaa iyo in aad hesho lacag bixinta ilaa iyo inta aad nooshahay. Si fiican uga fikir sida dhaqaalahaagu noqonayo wakhtiga mustaqbalka. Dadka intooda badan waxay doortaan lacag bixin in ay helaan nolosha oo dhan, maadaama badanaaba aynu noolaano cimri ka dheer inta aynu u malaynayno-

**4. Miyaad u baahantay wax ilaaliya qoyskaaga?**

Adigaaga ka shaqeeya degmo ama gobol waxaad ku jirtaa ilaalinta lacag celinta ee lacagta shaqaalaha hawlgabka ah. Taas micnaheedu waa in qofka aad is qabtaan, lamaanaha aad wada nooshihiin ama carruurtaadu ay heli karaan lacagtaada hawlgabka marka aad geeriyooto. Haddii aadan qoys lahayn, waxaad ka saari kartaa

ilaalinta si adigu aad u hesho xoogaa dheeraad ah dhanka lacagta hawlgabka. Ka hubi shirkadda caymiska ee aad dooratay in aad haysato ilaalinta lacag celinta.

## Codso lacagta hawlgabka ee guud

Lacagta hawlgabka ee guud waxaa bixisa Hay'adda qaran ee hawlgabka waxaanay ka koobantahay:

- Lacagta hawlgabka ee dakhliga ku salaysan
- Lacagta hawlgabka dheeraadka ah
- Lacag hawlgab oo kabis ah haddii ay jirto

Sannadka aad dhalatay ayaa go'aaminaya marka ugu horreysa ee aad codsan karto lacagta hawlgabka ee guud. Codso saddex bilood ka hor xilliga aad rabto in aad hesho lacagtaada hawlgabka ee ugu horeysa iyo weliba lix bilood ka hor haddii aad ku nooleyd dalka dibeddiisa.

Waxaad codsan kartaa lacagta hawlgabka ee guud marka aad aqoonsiga elaktarooniga ah ku gashid pensionsmyndigheten.se. Haddii aanad haysan aqoonsi elaktaroonig ah, la xiriir Hay'adda qaran ee hawlgabka adeegeeda macaamiisha ee 0771-776 776.

## Codso lacagta shaqaalaha hawlgabka ah

Haddii aad lahayd shaqo-bixiyayaal badan markaas waxaad lacagta shaqaalaha hawlgabka ka heli kartaa dhowr dhinac. Gal shirkadaha caymiska ee aad lahayd, ama minpension.se si aad u aragto dhammaan hawlgabkaaga.
Lacagtaada shaqaalaha hawlgabka ah ee dhanka AKAP-KR waxaa si toos ah loo bixiyaa bisha ku xigta marka aad buuxiso 70 jir, laakiin adiga ayaa dooran kara in aad qaadato wakhti ka horeeya ama ka dambeeya. Ugu horeyn waa marka aad tahay 62 jir. Waxaad haysataa fursadda ah in aad hakiso oo dheereyso wakhtiga lacag bixinta ee lacag bixin markaas socota.
La xiriir shirkadda caymiska ee aad dooratay si aad u bilowdo lacag bixinta.

Haddii aad leedahay lacag hawlgab dheefeed qeexan, waxaad kala bixi kartaa ugu horeyn laga bilaabo da´da 61 jirka. Waxaad ka codsanaysaa shaqo-bixiyahaaga, qaanuun ahaan ugu dambeyn saddex bilood ka dib ka hor marka aad rabto inaad hesho lacag bixintaada.

Adigaaga buuxiyay 28 jir ee shaqaale ka soo ahaa degmo ama gobol ka hor 1998 waxa kale oo aad macaashtay lacag hawlgab sida waafaqsan qaanuunyada hawlgabka, waxa lagu magacaabo xaqa lacag hawlgab oo la macaashay. Lacagtan hawlgabka waxaa la bixiyaa caadi ahaan nolosha oo dhan, ugu horeyn laga bilaabo da´da 61 jir iyo ugu dambeyn laga bilaabo da´da 67 jir. Ka codso shaqo-bixiyahaaga.